TUSMADA

HORDHAC 3

GUURKA KA HOR **Doorashada Ninka** 5

Qodobka koowaad: **Addeec Ninkaaga** 7

Qodobka labaad: **ka mahadnaq abaalka Ninkaagu** 11

Qodobka Saddexaad: **Hadal wanaagsan** 18

Qodobka Afraad: **u hadiyee ninkaaga** 20

Qodobka Shanaad: **Nadaafada iyo qurxinta naftaada ku** 22

Qodobka lixaad: **Haku badin Ninkaaga dalabbaadka** 25

Qodobka Toddobaad: **Xifdi sirta Ninkaaga** 27

Qodobka Siddeedaad:**Ninkaaga dabeecaddiisabaro** 30

Qodobka Sagaalaad: **Ku Daddaal Cusboonaysiinta** 31

Qodobka Tobnaad: **Ka fogow cabashada badan & calaacalka** 32

Qodobka Kow iyo Tobnaad: **Ka fogow warka dumarka** 35

Qodobka Laba iyo Tobnaad: **Noqo gabadh nafteeda** 37

Qodobka Saddex iyo Tobnaad: **Nolosha U qaabil sida ay** 39

Qodobka Afar iyo Tobnaad: **Ha Canaanan Ninkaaga** 41

Qodobka Shan iyo Tobnaad: **Marka uu faraxsan yahay la** 43

Qodobka Lix iyo Tobnaad: **Ehelka ninkaagu waa** 45

Qodobka Toddoba iyo Tobnaad: **Qaabilaadda ninka marka** 47

Qodobka Siddeed iyo Tobnaad: **Qaabka loola dhaqmo** 49

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qodobka Sagaal iyo Tobnaad: **Marka uu cadhoodo** 50

Qodobka Labaatanaad: **Marka uu xanuunsado** 55

Qodobka Kow iyo Labaatanaad: **Gogosha** 56

Qodobka Laba iyo Labaatanaad: **Shaqadiisa** 58

Qodobka Saddex Iyo Labaatanaad: **Cuntadiisa** 59

Qodobka Afar iyo Labaatanaad: **Xalinta Khilaafaadka** 60

Qodobka Shan iyo Labaatanaad: **Iska Jir Hinaasaha aan** 61

Qodobka Lix iyo Labaatanaad: **Ninkaaga ha waydiin** 65

Qodobka Toddoba iyo Labaatanaad:**Qalbigaaga haku qarsan** 66

Qodobka Siddeed iyo Labaatanaad: **Dhoolacadayn** 67

Qodobka Saggaal iyo Labaatanaad: **Dhoolacadayn** 68

Qodobka Soddonaad: 69

Qodobka Kow Iyo Soddonaad: 70

Qodobka Laba Iyo Soddonaad: **Ku Dadaal Quruxda** 71

Qodobka Saddex Iyo Sodonaad: **Ha Noqon Gabadh Galid** 72

Qodobka Afar Iyo Soddonaad: **Baro Oo Caado Ka Dhigo** 73

Gunaanad 74

Tixraaca 76

Telegram @SOMALIBOOKS

HORDHAC

Ilaahay baa mahadleh isaga ayaan ka gargaar dalbaynnaa, isaga ayaan danbi dhaaf waydiisannaynaa, isaga ayaan sharka nafteena ka magan gallaynnaa, ninka ilaahay hanuunniyaa cidina ma lumin karto, ka Ilaahay lumiyaanna cidinna ma hanuunin karto. Waxaan qirayaa in Alle mooyee Alle kale oo xaq lagu caabbudaa jirin, waxa kale oo aan qirayaa in Maxamedna rasuulkii ilaahay yahay.

Intaa kadib:

Gabadha muslimadda ah ee wanaagsani waa ta gurigeeda ka dhigta jannada aduunyada, waxayna sidaa kaga dhigi kartaa ilaahay oo ay si dhab ah u caabuddo iyo ninkeeda oo ay addeecdo.

Sidaa daraadeed nabigu waxa uu ku tilmaamay gabadha wanaagsani inay tahay mid ka mid ah raaxada adduunyada, halka ay gabadha xunnina ay tahay mid kamida hoogga aduunyda; isaga oo arintaa tilmaamaya wuxuu yidhi:

((أربعٌ من السعادة: المرأةُ الصالحة، والمسكنُ الواسِع، والجارُ الصالح، والمَرْكَب الهنيء، وأربعٌ من الشقاء: المرأة السوء، والجار السوء، والمركب السوء، والمسكن
الضيِّق))

وأخرَجَه كذلك أحمد مُختَصَرًا

"السلسلة الصحيحة" وقال الألباني

مُعَلِّقًا على رواية ابن حبَّان: هذا سند صحيح على شرط الشيخين

(Afar waa sacaaddada adduunyada; gabadh wanaagsan, guri waasic ah, jaar wanaagsan, iyo markab wanaagsan)

(Afarna waa hoogga adduunyada Naag xun, jaar xun, mark-ab xun, iyo guri cidhiidhi ah).

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

Gabadh kastaaba way jeceshahay inay ninkeeda kasbato, way jeceshahay inuu jeclaado, way jeceshahay inuu hadalkeeda maqlo, way jeceshay inay nolol fiican oo xasilloon ku noolaato, way jeceshay in ilaahay siiyo caruur wanaagsan oo tarbiyad fiican leh.

Haddaba su, aasha meesha taala waxay tahay tahay tiro intee le, eg oo dumar ah ayaa si dhab ah ugu guulaysta arimahaas aan soo sheegnay?, kuwa ku guulaystaase maxay sameeyaan? Kuwa guuldaraystaase maxaa sababay guuldaradooda.

Buuggan aan u bixinnay Kasbo Ninkaaga ayaa arintaa ka jawaabaya.

Runtii waa kitaab kooban, laakiin waa kitaab aan odhan karno macluumaadka ku jiraa waa mid gabadha muslimadda ah u noqon Kara meel ay u noqoto oo marka ay muddo joogtaba dib u akhrido si ay nolosheeda dib ugu cusboonnaysiiso.

.Waxa uu kuu soo koobayaa qodobo muhiima oo gabadha ka caawinaya sidii ay nolosha guurkeeda ugu guulaysan lahayd, sidii ay ninkeeda u kasban lahayd. Waxaa kale oo uu buuggu tilmaamayaa arimo badan oo keeni Kara in gabadhu ay ninkeeda ku waydo, sababna u noqon Kara in gurigeedu dumo. Si aad walaashayda muslimada aheey buuggan uga faaidaysato waa inaad cilmiga ku jira ficil u badashaa oo aad ku dhaqantaa. Cilmiga haddii aan lagu dhaqmin qiimo ma leh balse xujo ayuu inaggu noqoni maalinta qiyaamaha.

Ilaahay waxaan ka baryayaa in kitaabkan uu ku anfaco gabdhaha muslimmiinta ah ee soomaaliyeed, anigana uu miisaanka xasanaadkayga iigu daro maalinta maal iyo wiilal ayna waxba tarayn. Aamiin aamiin.

Wabilaahi Tawfiiq

Sheikh Ismaaciil Tukaale Cige.

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

GUURKA KA HOR
DOORASHADA NINKA

Gabadhu inta aanay guursan ka hor haku dadaasho inay doorashada wanaajiso, gabadha sidaa yeeshaa waxay cagta saartay dariiqii guusha iyo liibaanta.
Islaamkuna arintaa wuu innagu baraarujiyay innaguna dhiirrigaliyay.
Rasuulku naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yidhi
إذا جاءكم من ترضون دينه وخلقه فزوجوه إلا تفعلوه تكن فتنة في الأرض وفساد كبير
رواه الترمذي وغيره.
(Haddii uu idiin yimaaddo nimaad raali ka noqotaan diintiisa iyo akhlaadiisa u guuriya haddii aad sidaa yeeli waydaan, waxaa dhulka ka dhici fidno iyo fasaad badan)
Sifada ninka wanaagsani markaa waa diin iyo Akhlaaq wanaagsan.
Gabadhyahay haddaba ninka ku dooro oo ku qiimee labadaa arimood oo haddii aad ka hesho ku dheg oo yaannu ku dhaafin.
Taabiciga wayn ee Xasan Albasri ayaa Nin kula dardaarmay oo ku yidhi:
(Gabadhaada u guuri mid diin u saaxiib ah haddii uu jeclaado wuu karaamayn haddii uu nacana dulmin maayo)
Laakiin maanta marka aad u fiirsato bulshadeenna waxaad arkaysaa in dad badani ay ka dhigteen guurka mashruuc ganacsi oo ninka lagu qiimeeyo muxuu adduun hayaa, oo la

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

iska indho tiro diintiisa iyo akhlaadiisa.

Bal u fiirso xadiiskan Nin ayaa soo maray qolo meel fadhida, Rasuulka ayaa wayddiinaya oo odhanaya ninkaa Bal ka warama maxaad ka odhan lahaydeen? Waxay yidhaahdeen ninkaasi wuxuu mudan yahay haddii uu gabadh kaa soo doono in loo guuriyo, haddii uu shafaaco ku waydiistana in laga aqbalo haddii uu hadlana in hadalkiisa la maqlo. Kadibna wuu aamusay nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee. Nin kale oo kamida foqorada muslimiinta ayaa haddana soo maray isla bartii, Rasuulkuna wuu waydiiyay oo wuxuu ku yidhi: bal kanna ka warama maxaad ka odhan lahayddeen? Waxay yidhaahdeen kani wuxuu mudan yahay in haddii uu gabadh soo doonto inaan loo guurin, haddii uu shafaaco kaa dalbana inaan laga aqbalin, haddii uu hadlana inaan la maqlin. Nabigu Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yidhi: Kani wuxuu kaa ka khayr badan yahay dhulka mugii.

(Yacnii Kan danbe ee miskiin ah ayaa kii hore ka khayr badan dhulka mugii)

Taas macnaheedu maaha inaan gabadha muslimada kula talinnayno inay guursato nin faqiira, laakiin waxaan u jeednaa nin faqiira oo wanaagsan ayaa kaaga khayr badan nin qani ah oo faasiqa.

Waxaa arintana tusaale inoogu filan salafkeenii wanaagsanaa; kani waa Saciid binu musayib oo ahaa Taabici caan ah oo caalim ah oo zaahid ah, wuxuu gabadhiisa oo lagu yaqaannay qurux, edeb iyo diin u diiday inuu u guuriyo Waliid binu Cabdilmalik oo ahaa wiilkii uu dhalay khaliifada muslimiintu, markaasuu u guurinnayaa mid kamida ardaydiisa oo lagu magacaabo Abaa Wadaaca oo meherkeedana uu ka dhigay laba dirhum ama saddex.

Telegram:@SOMALIBOOKS

QODOBKA KOOWAAD
ADDEEC NINKAAGA

Gabadha muslimadda aheey waxaad ogaataa xasilloonida nolosha iyo inaad ku guulaysato nolosha guurka, kuna noolaato rarayn iyo farxad waxaa saldhig u ah Addeecidda ninkaaga.
Waxaad ogaataa gabadhyahay muslimadda ahi in guurku yahay shirkad, shirkaduna sida aad ogtahay waxay u baahan tahay maamule kaas oo nidaamiya oo isku dubarrida arimaheeda, sidaa daraaddeed ayuu ilaahay ninka shaqadaa u doortay.

Ilaahay wuxuu quraankiisa ku yidhi:
الرجال قوامون على النساء بما فضل الله بعضهم على بعض وبما أنفقوا من أموالهم
(Ragu iyaga ayaa dumarka ka sarreeya, waxa ilaahay ku kala faddilay awgeed iyo waxa ay bixinnayaan oo maal ah).
Gabadha muslimadda ahna markaa waxaa la gudboon inay maamulkiisa ogolaato oo ay ku addeecdo, oo ay u fahanto in adeecitaankaasi yahay mid cibaado ah oo ay ilaahay ugu dhawaannayso Nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee.
إذا صلت المرأة خمسها وصامت شهرها وحفظت فرجها وأطاعت زوجها قيل لها ادخلي الجنة من أي أبواب الجنة شئت.
ورواه ابن حبان في صحيحه عن أبي هريرة رضي الله عنه، والحديث صححه الألباني في الجامع الصغير.
(Haddii ay gabadha muslimadda ahi tukato shanteeda,

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

bisheedana soonto ninkeedana addeecdo waxaa lagu yidhaahdaa jannada ka gal meel alla meesha aad doonto.).
Addeecida laga rabo gabadha muslimada ahi waxaa soo hoos galaya

1. **Marka uu u yeedho oo ay Ajiibto marka uu u yeedho:** Waxa uu doono ha ugu yeedhee inay hadalkiisa maqasho, haddii uu furaashka ugu yeedhana ay si dagdaga u maqasho, haddiise ay diido waxay noqonaysaa mid danbi gashay oo ilaahay caasiday oo lacnada malaaigta mutaysatay sida uu yidhi nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee.

حديث أبي هريرة -رضي الله تعالى عنه- قال: قال رسول الله -صلى الله عليه وسلم إذا دعا الرجل امرأته إلى فراشه فأبتْ فبات غضبان عليها لعنتها الملائكة حتى تصبح...متفق عليه.

(Haddii uu ninku xaaskiisa furaashkiisa ugu yeedho oo ay diiddo oo uu cadho ku waabarriisto, malaaigta ayaa nacdasha ilaa inta waagu ka baryayo).

2. **In aanay guriga ka bixin isaga oo u idma mooyee:** Addeecida waxaa kamida inaanay guriga ka bixin isaga oo u oggolaada mooyee, bixitaankeeduna waa inuu ahaadaa mid waafaqsan sharciga oo ay jidhkeeda xijaabka sharciga ah ku sii daysaa oo ay indhaheedana laabtaa marka ay dariiqa

Telegram @SOMALIBOOKS

socoto, lugaheedanna ayna dhulka ku dhufan. Haddii ay cid rag ah la hadlaysana ayna hadalka u dabcin si ka qalbigiisa bukaa aanu u damcin.

3. **In marka uu maqan yahay ay xifdido nafteeda, maalkiisa, iyo caruurtiisa:** Addeecida waxaa asal u ah in gabadhu marka ninkeedu safro ay nafteeda xifdido, waayo nafteedu waa ammaano, inay maalkiisa xifddido oo aanay ku bixin illaa wixii uu isagu ogolyahay mooyee, marka laga reebo wixii ay ogtahay inuu raali ka yahay sida sooridda martida, ama qof gaajaysan oo ay cuntaysiiso. Wixii intaa ka soo hadhay waa inay ka digtoonaataa.

Rasuulkuna wuxuu yidhi:

خَيْرُ النِّسَاءِ إِذَا نَظَرْتَ إِلَيْهَا سَرَّتْكَ وَإِذَا أَمَرْتَهَا أَطَاعَتْكَ ، وَإِذَا غِبْتَ عَنْهَا حَفِظَتْكَ فِي مَالِكَ وَنَفْسِهَا : ا".

(Dumar waxaa ugu khayr badan ta marka aad eegto ku farxad galisa, marka aad amartana ku addeecda, marka aad maqantahayna xifdida nafteeda iyo maalkaaga.)

Gabadh yahay waad u jeedaa in quraanka iyo sunnuhuba ay adkeeyeen in gabadhu ninkeeda adeecdo.

Addeecidaasi waa mid aad ninkaaga qalbigiisa ku kasbanayso, waa mid gurigaaga ka dhigaya meel xasilloon oo bilaa buuq ah, bilaa hadal ah, bilaa dagaal ah.

Haddiise lagaa waayo addeecida ninkaaga, ogow in gurigaagu

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

uu noqon doono meel aan xasilloonayn, oo aan deganayn, meel had iyo jeer moron ka jiro, doodi ka jirto, dacwadi ka jirto.

Gabadhyahay muslimada aheey, kasoo qaad in gurigu yahay dawlad, dawladdaasi haddii wasiiradeeda, hogaamiyayaasha ciidanka, shaqaalaha iyo shacabkuba ay yihiin qaar u hogaansan madaxwaynahooga, dawladaasi waxay noqonaysaa mid nabagelyo ku naaloota, barwaaqo, iyo horumar, haddiise ay dawladu tahay mid uu ka jiro is qabqabsi siyaasadeed oo madaxwaynaha laga hor yimaado waxaad dareemi kartaa dhibaatada ka dhalan karta arintaas iyo saamaynta ay arintaasi dalka ku yeelan karto.

Walaashayda muslimka aheey gurigaaguna waa dawlad oo kale, markaa adigu kala dooro in dawalada aad wasiirka arimaha gudaha ka tahay ay noqoto mid kala danbayn iyo is ixtiraam leh iyo inay noqoto mid fawdo ah.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LABAAD:

KA MAHADNAQ ABAALKA NINKAAGU KUU GALO.

Ninkaagu haddii uu abaal kuu galo ku dadaal inaad uga mahadceliso iskana jir inaad ka abaal darto.
Dumarku inta badan wanaaga uu ninkeedu u sameeyo way iska illoobaan, oo Kama shukri celiyaan, arintaasi waa mid khatarteeda leh sida uu nabigu tilmaaay, nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee:

telegram @SOMALIBOOKS

عَنْ عَبْدِ الله بْنِ عَمْرٍو ، قَالَ: قَالَ رَسُولُ الله صَلَّى الله عليه وسَلَّمَ لا يَنْظُرُ الله إِلَى امْرَأَةٍ لا تَشْكُرُ لِزَوْجِهَا ، وَهِيَ لا تَسْتَغْنِي عَنْهُ

(Cabdilaahi ibnu cumar waxaa laga wariyay inuu rasuulku yidhi: ilaahay ma eego Gabadh aan ninkeeda u mahadcelin iyada oo aan ka maarmayn).

Gabadha muslinka aheey ogow in arimaha ugu badan ee dumarku ay naarta ku galaana ay kamid tahay inay ninkeeda wanaagiisa inkirto.
Nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ahaatee

@SOMALIBOOKS

wuxuu yidhi:
خرج رسول الله صلى الله عليه وسلم في أضحى، أو فطر، إلى المصلى، فمر على النساء، فقال : يا معشر النساء تصدقن فإني أريتكن أكثر أهل النار. فقلن : وبم يا رسول الله؟ قال : تكثرن اللعن، وتكفرن العشير

(Dumaroow sadaqada la baxa waxaan idin arkay in haddaad dumar tihiin naarta ugu badan tihiine, waxay yidhaahdeen rasuulkii ilaahayoow maxay sidaasi ku dhacday, rasuulku wuxuu yidhi: nacdasha ayaad badisaan, ninkiina wanaagiisana waad inkirtaan oo aad ku gaalawdaan).

Oo haddii uu waligii wanaag idiin sameeyo oo maalin kaliya xumaan ka aragtaan waxaad tidhaahdaan waligayba khayr kaama arag))

Halkan waxaan kuugu soo gudbinayaa Qiso ka turjumaysa arintan:
Waxaa jiray boqor kamida boqoradii muslimiinta ee ree Andalus (Waa dalka maanta loo yaqaan Isbayn) oo wuxuu gaar ahaan xukumi jiray gobolka loo yaqaan Ashbiiliya, boqorkaa magaciisa waxaa la odhan jiray Maxamed Binu Cubbaad. Maxamed isaga oo maalin maalmaha kamida la socda mid kamida wasiirradiisa oo la odhan jiray Ibnu Cammaar oo ay socdaan wabiga daafihiisa , oo ay sheekaysanayaan, ayaa

Telegram @SOMALIBOOKS

waxaa dhacday in dabayli soo kacday, kadib Boqorkii ayaa gabay dabaysha ku saabsan tiriyay, laakiin wuxuu illoobay qaybtii kale ee baytka dhamaystiraysay, saaxiibkii ayuu eegay oo uu ka dalbday inuu xasuusiyo qaybta dhiman, saaxiibkiina waa garan waayay, waxaa hadalkooda maqlaysay gabadh jaariyada oo wabiga dhinaciisa dhar ku maydhaysay, markaasay gabaygii iyadu dhamaystirtay, boqorkii gabadhii buu fiiriyay mise waa gabadh qurux ilaahay siiyay oo haddana gabayaa ah' boqorkii wuu waraystay qoyska ay ka soo jeedo, waana loo sheegay, wuxuu dalbaday in gabadha si dhakhso ah loogu keeno si uu u guursado, sidaa ayuu boqorkii gabadhii ku guursaday, wuxuuna jeclaaday jacayl aan qiyaas lahayn, wax kasta oo ay doontana waa u samayn jiray .

Maalin maalmaha kamida ayay gabadhii waxay aragtay gabdho iibinaya caano oo dhoobada dhex socda oo xaynkana kor u qaadaya, gabadhii waxay xasuusatay waayo waayo iyo wixii ay samayn jirtay, boqorkiibay ku tidhi inaan sidaa gabdhahaasi samaynayaan sameeyo ayaan doonayaa, boqorkii wuxuu amar ku bixiyay in guriga daaraddiisa la balaadhiyo oo loo sameeyo meelo barkado ah oo biyuhu fadhiisataan oo xaddi badan oo cadarka la yidhaa miskiga iyo kaafuurkana la soo iibiyo oo dhoobo laga dhigo, sidii baa loo sameeyay,kadib ayaa wuxuu ku yidhi haddaba adiga iyo gabdhahaagu

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

halkaa ku ciyaara

Adduun war iyo sheekaa ka hadhee, waayihii baa is baddalay boqorkiina waa la afgambiyay oo dawladii islaamka ee Maqrib xukumaysay oo waqtigaa la odhan jiay Muraabiddiin ayaa xukunka ka qaaday, maxaa yeelay gaalada ayuu gargaar waydiistay, kadib isaga iyo reerkiisii waa la qabtay waxaana loo masaafuriyay Maqrib oo ah waqooyiga afrika, silsiladna lugaha ayaa lagaga xidhay, wax lacag ahna looma ogolayn, gabdhihiisii iyo xaaskiisiiba magaalada ayay u xoogsi tagi jireen, habeenkiina wixii ay soo helaan ay kula soo laaban jireen.

Maalin maalmaha kamida ayay xaaskiisii isku xanaaqeen, markaasay waxay ku tidhi: (waligayba khayr kaama arag)).

Wuxuu ugu jawaabay:

(ولا يوم الطين)

xataa maalintii aan dhoobada kuu sameeyayna dhahoo!!!!!!

Markuu arintaa xasuusiyay ayay naxday oo ay ooyday. Waxaa la sheegaa muddo yar kadibna waxay la dhimatay ciil iyo murugo, isagana waxaa la sheegayaa inuu ka danbeeyay saddex bilood oo kaliya oo muruggadeedii ayuu u dhintay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxa aynu qisadan ka qaadanaynaa in dumarku ay wanaag kasta oo loo sameeyo iska illoobaan, oo gabadhaas sida aan qisada ku soo akhrinay, wax kasta oo ay jeclaato wuu u samayn jiray heer uu gaadhay in guriga dhexdiisa looga sameeyo barkado cadar iyo kaafuur ka samaysan si ay ugu dul ciyaarto, muddo kadib markii ilaahay qaddaray in ay noqdaan dad foqora ah, way illawday wanaagii oo waxay tidhi waligayba khayr kaama arag. Isaguna wuu xasuusiyay oo wuxuu yidhi Wallaa yoomu diin (maalintii dhoobadana dhahoo).

Markaa gabadha muslimada aheey ku dadaal inaad wanaaga ninkaagu kuu falayo uga mahadceliso, hadii aad tiriso nimcooyinka ilaahay ninkaaga awgii kugu siiyay ma soo koobi kartid; wuxuu kuu yahay wehel iyo hu, wuxuu ku siiyaa biil, wuxuu kuu iibiyaa aradbeel, wuxuu ku dhigay guri aad ku asturan tahay, wuxuu ilaahay kaa siiyay caruur, adiga oo waxaas oo dhan haysta ayaa haddana haddii maalin aad wax yar ka dareento aad illoobaysaa waxaas oo dhan markaasaad leedahay waligayba khayr kaama arag. Walaashayda muslinka aheey ilaahay ka baq oo nimcada ilaahay ku siiyay ha ku kufrinin.

Telegram @SOMALIBOOKS

Ilaahayna wuxuu yidhi:

وإذ تأذن ربكم لئن شكرتم لأزيدنكم ولئن كفرتم إن عذابي لشديد

(Haddii aad shukridaan waan idiin siyaadin haddii aad nimcada ku gaalowdaanna cadaabkaygu wuu kulul yahay)

Walaashayda muslimada aheey, haddii nimcada aad haysato aad ku shukri waydo waxaad halis ugu jirtaa inuu ilaahay kaa qaado. Imisa dumar ah ayaa markay nimacadii ilaahay siiyay ku shukrin waayeen ilaahay ka qaaday oo haddii aad hareerahaaga eegto aad ogaan kartaa.

Markaa walaashayda muslimada aheey ku dadaal shukriga nimcada oo ninkaagu ka mid yahay.

Adduunyada ha eegin cidda kaa fiican sida kuwa kaa lacag badan, kuwa kaa guri fiican waxaad eegtaa kuwa kaa hooseeya

Nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee:

عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم :"انظروا إلى من هو أسفل منكم. ولا تنظروا إلى من هو فوقكم؛ فهو أجدر أن لا تَزْدروا نعمة الله عليكم" متفق عليه.

(Eega cidda idinka hoosaysa, ha eegina cidda idinka saraysa marka aad sidaa yeeshaan nimcada ilaahay idin siiyay ma xaqiri doontaane).

Telegram @SOMALIBOOKS

Marka aad wanaagga ninkaagga uga mahadceliso waxaad ninkaaga dareensiisay inaad tahay qof abaal loo gali karo, taasi oo uu had iyo jeer ku daddaali doono inuu mar kasta wanaag kuu sameeyo, haddiise aad inkirto, taasi waxay sabab u noqonaysaa in ninkaagu uu niyad jabo ogaadana inaad tahay qof aan u qalmin wanaaga iyo ixsaanka, dib danbana uu wanaag danbe kuugu gali waayo.

dal ninkaaga kalmado aad u wanaagsan kana fogow

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SADDEXAAD: HADAL WANAAGSAN

Kula hadal ninkaaga kalmado aad u wanaagsan kana fogow kalmadaha xun xun.Ogow gabadha muslimadda aheey in kalmadda wanaagsani ay tahay sadaqo, taas oo loo baahan yahay in qof kasta aad kula hadasho, ninkaaguna ogow isaga ayaa mudnaanta koowaad leh.

Kalmmada wanaagsani waxay furtaa qalbiga, kalmadda wanaagsani waxay dejisaa cadhada, kalmmada wanaagsani waxay sabab u noqotaa saaxiibtinnimo wanaagsan. Taa lidkeeda gabadhyahay muslimmada ahi ka fogow kalmmadaha xun xun, ogow kalmmada xuni waxay dhaawacdaa qalbiga, kalmmada xuni waxay keentaa cadho, kalmmada xuni waxay sabab u noqotaa xidhiidhka adiga iyo ninkaaga oo xummaada. Diinteena suubbani hadalka fiican way innagu boorisay waxayna inooga digtay hadalka xun.
Nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee

وعن عبدالله بن عمرو رضي الله عنهما، عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: في الجنة غرفة يُرى ظاهرها من باطنها، وباطنها من

Telegram@SOMALIBOOKS

ظاهرها)) فقال أبو مالك الأشعري: لمن هي يا رسول الله ؟ قال: " لمن أطاب الكلام، وأطعم الطعام، وبات والناس نيام.

Xadiiska waxaa warinaya Cabdilaahi ibnu cumar raali allaha ka noqdee Wuxuu nabiga ka wariyay: inuu yidhi: ***(Jannada waxaa ku yaala qolal adoo dibada ka jooga laga arkayo waxa gudaha ku jira, marka aad gudaha ka joogtana aad arki waxa dibadda ka yaala).*** Abuu maalik Ashcari ayaa waydiiyay Rasuulkii ilaahayoow yaa iska leh qolalkaa? Wuxuu yidhi nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee waxaa iska leh qofka hadalka wanaajiya, dadkana cuntada siiya, ee tukada dadka oo hurda).

Dareensii ninkaaga jacaylka aad u hayso, adiga oo kula hadlaya hadallo fiican oo jacayl ah. Sida xabiibi waan ku jecelahay, adiga la, aantaa ma noolaan karo, macaane iwm, kadibna dhunkasho macaan aad hab ku siiso. Ku dadaal arimahaas oo ha dhayalsan waxaad arki inaad kasbato qalbiga ninkaaga.

Dumar fara badani arintaa jahli bay kaga sugan yihiin taasina waxay keenaysaa inay wanaag badan iyo farxad badan oo ay ninkeeda la wadaagi lahayd sidaa ku waayaan.

Arimaha ugu badan ee keena mashaakillada qoyskuna waa maqnaashaha naxariista iyo hadallada wanaagsan.

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

QODOBKA AFRAAD:
U HADIYEE NINKAAGA

Caado ka dhigo inaad wax uun u hadiyaddayso ninkaagga haba yaraadee, taasi waxay keeni doontaa xidhiid wanaagsan oo saaxiibtiinino leh.
Nabiguna wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelko korkiisa ha ahaatee:

قال الرسول صلى الله عليه وسلم :
" تهادوا تحابوا"

(Isku hadiyeeya waad is jeclaanaysaane).
Haddii markaa dadka oo dhan isku jeclaanayaan waxaa ugu sii mudan inaad ninkaaga u hadiyaddayso si uu kuu jeclaado, oo aad qalbigiisa ku kasbato.

Hadiyaddu kaliya maaha shay muhiima oo qaali ah, waa wax kasta oo aad ogtahay in ninkaagu iskaga baahan yahay oo laga yaabo inuu isagu haleel uu ku soo iibsado waayay.

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaa muhiima ah inaad kadis kaga dhigto oo isaga oo aan kaa filayn aad siiso.
Tusaale ahaan waxaad u hadiyadayn kartaa, cadar yar oo udgoon, garan, sharaabaad, warqad gal ku jirta oo ay ku qoran tahay (waan ku jecelahay) , waxaad u hadiyaddayn kartaa macawis, iyo wax kasta oo aan adigana lacag badan kugu joogin isagana farxad galinaya.

Ninkaagu marka uu ku arko inaad sidaa u dhaqmayso, isaguna wuxuu bilaabi doonaa inuu adiggana kuu abaal gudo oo waliba hadiyad ka muhiimsan taada uu ku siiyo, sidaana uu ku hagaago xidhiidhka idiin dhexeeya adiga iyo saygaagu.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SHANAAD NADAAFADA IYO QURXINTA NAFTAADA KU DADDAAL

Gabadha muslimadda ahi inay ahmiyad wayn siiso nadaafada jidhkeeda iyo qurxinta nafteeda, waana mid kamida waajibaadka gabadha laga rabo, taasi oo keenaysa inay indhaha ninkeeda soo jiidato, si ay qalbigiisa u kasbato Nadaafada waxaa kamida inay maydhashada joogtayso, inay ciddiyaha iska gurto, inay cadayga ku dadaasho. Waxaa iyaduna aad muhiim u ah marka gabadhu is nadiifiso inay is cadriso.

Gabadhu isqurxinta waxay u isticmaalaysa waxyaalaha la isku qurxiyo oo dhan marka laga reebo daawooyinka kimikada ah ee gabadha jidhkeeda waxyeelaya.

Waxyaalaha gabadhu inay isku qurxiso loo baahan yahay waxaa kamida indhakuusha, xinnaha oo gacmaceeda ay ku xaradho. Iwm
Imaam Awzaaci wuxuu mucaawiye binu salama ka

Telegram @SOMALIBOOKS

wariyay in nabigu arkay haweenay da, deedu dhaaftay todobaatan oo aan gacanteedu aanay xinno lahayn, markaasuu rasuulku naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee yidhi:
(Yaanay midkiina gacanteeda ka dhigin sida gacanta ninka oo kale Wuxuu yidhi mucaawiye: haweenaydii waligeed oo danbe xinno Kama tagin ilaa ay ka dhimatay).

Arintannina waxay kamid tahay arimaha ugu waawayn ee aad ninkaaga ku kasbanayso.
Marka aan bulshadeena dib ugu soo noqono halkee baan ka taaganahay arintan, kolley in dumarka xukun kaliya la wada siiyaa maaha mid caddaalada waafaqsan oo way ku kala duwan yihiin arintan, mid iyo kartideed iyo aqoonteed, laakiin waxaynaan dafiri Karin in dumar badani arintaa aad ugu liitaan oo aanay ninkooda wax xil ahba iska saarin gaar ahaan marka laga baxo sanadka hore, oo laga yaabo in gabadhu ninkeeda ugu timaado iyada oo xidhan dharkii madbakha ay kaga shaqaynaysay oo urtii cuntadu ka urayso, iyada oo ninkeeda u aragta qof caadiya oo xaafada ka tirsan. Sida aynu wada ognahay gabadhu waxay xil wayn iska saartaa maalinta ay xaflad tagayso, waad aragtaa sida ay u diyaargarawdo ee waqti badan oo saacado gaadhaya ugu lumiso sidii ay isku qurxin lahayd.

telegram@SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

Gabadhyahay ninkaaga ayaa xaflada ka mudan oo kaaga xaqleh, oo marka uu kuu soo galo aad farxad galiso, oo uu kugu indho qabawsado, qalbigiisana aad meel ku yeelato, laakiin haddii uu ku arko adiga oo aan nadiif ahayn, adiga oo aan is qurxin, taasina qalbigiisa way kaa sii jeedinaysaa, shaydaankuna wuxuu helayaa meel uu ka soo galo oo haween kale ayuu u hanqal taagi doonaa, markaasaad hinaasi doontaa, laakiin ogow adiga ayaa sababta iska leh.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LIXAAD:
HAKU BADIN NINKAAGA DALABBAADKA

Noqo mid waaqica la socota oo og kolba xaaladda dhaqaale ee ninkaagu ku sugan yahay. Dumarka qaar kamidda ayaan wax war ahba ka hayn duruufta ninkeeda, oo kaliya waxaa u muuqda waxa ay doonayso iyo baahiddeeda. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad tahay mid leh qanaaco oo raali ku ah wixii ilaahay siiyay.

Waxaa laga wariyay Abii saciid inuu yidhi:
In nabiga Ilaahay naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee uu khudbadeeyay oo khudbadii dheereeyay, kuna sheegay adduun iyo aakhiraba, wuxuu sheegay oo kale arimihii ugu horeeyay ee sabab u noqota in ree Banii Israaiil la halaago in gabadha faqiirka ahi ay ninkeeda ku kalifi jirtay inuu soo gado dhar iyo agab lamida waxa ay haweenayda qaniga ahi ninkeeda ka dalbato.

Inkasta oo aanay gabadha u habboonayn dalab badani, haddana arinku wuxuu sii daran yahay marka ninka

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

dhaqaalihiisu liito, taasi oo ku keenta ninka niyad jab, mar kasta oo ay xaaskiisu wax ka dalbato oo uu awoodi waayaba.
Gabadhu waxaa laga yaabaa inay saaxiibbadaheed ama jaarkeeda ay alaab ku aragto, isla markiiba ay ninkeeda ka dalbato iyada oo aan is waydiinayn in ninkeedu awoodo iyo inaanu awoodin.

Gabadha wanaagsan ee xishmada lihi maaha mid dalab badan, waa mid leh qanaaco oo kolba wixii ninkeedu siiyo ku qanacda. Wixii lagama maarmaan loogu baahan yahay ee ninkeedu awoodana si xikmad leh u xasuusisa ninkeeda una waydiisata.

Markaa gabadha muslimada aheey ogow in dalabka badan uu ninkaagu kugu dhibsanayo, kuuna arkayo gabadh baahi badan oo ku daddaalaysa raaligalinta nafteeda ee aan duruufta ninkeeda waxba kala socon, taasina ay xummaynayso xidhiidhka adiga iyo odaygaaga idiin dhexeeya.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA TODDOBAAD: XIFDI SIRTA NINKAAGA

Ninkaaga ha joogo ama ha maqnaadee xifdi sirtiisa guud ahaan iyo gaar ahaanba, waligaana ha u sheegin cid kale, gaar ahaan sirta la xidhiidha xidhiidhkiina gogosha, nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee:

حدثنا أبو بكر بن أبي شيبة حدثنا مروان بن معاوية عن عمر بن حمزة العمري حدثنا عبد الرحمن بن سعد قال سمعت أبا سعيد الخدري يقول قال رسول الله صلى الله عليه وسلم إن من أشر الناس عند الله منزلة يوم القيامة الرجل يفضي إلى امرأته وتفضي إليه ثم ينشر سرها.

((dadka waxaa ugu shar badan Alle agtiisa maalinta qiyaamaha nin xaaskiisa la jimaacay oo iyaduna la jimaacday oo kadibna wixii dhex maray fidinaya)).

Waliggaana ceebtiisa ha u sheegin mid kuu dhaw iyo mid kaa dheerba. Taa lidkeeda dadka hortiisa ka sheeg wanaaggiisa iyo sharaftiisa, taasi adigana sharaf bay kuu tahay, haddiise dadku ay ku arkaan inaad ninkaaga

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

ceebihiisa sheegayso taasi adigana ceeb bay kugu tahay dadkuna waxay kugu xamannayaan inaad tahay naag doqon ah oo shaqsiyadeedu liidato, markaa iska jir arintaas waligaa ha ku dagmin.

Dumarka inta badan waxay sirta ninkeeda sheegaan marka khilaaf yimaado oo ay cadhaysan tahay, oo ay ama u sheegtaa saaxiibadaheed ama qaraabadeeda, laakiinse gabadhaasi ha ogaato in dad badan oo ay moodayso inay nasteex u yihiin oo ay is leedahay wax ku qarso inay cadaw ku yihiin oo ay ceebteeda fidinnayaan kuna wiirsanayaan iska dhaaf inay mushkiladeeda xaliyaanne, taasi oo marka khilaafku dhamaado ay ka murugoon doonto. Soomaalidu waxay tidhaa doqoni meel lagu murmay in lagu kala tagay bay mooddaaye, ogow khilaafku inuu yahay shay dabiici ah oo mar kasta dhici kara, laakiin waxaad ogaataa in khilaafka la maarayn karo oo uu dhamaan karo. Haddiise aad aaminto in meesha lagu kala tagayo, ogow inaad khaldantahay, fahankaa khaldana waxaa laga yabaa inuu kugu sababo inaadan waxba tudhan.

Gabadha muslimada ahi nafteeda ha ku kalsoonaato oo haku dadaasho inay iyadu khilaafka xalliso inta ay karto oo aanay dibada u saarin, maxaa yeelay haddii khilaafku dibada u baxo waxaa soo gala shaydaan oo sida loo xallin lahaa way sii adkaataa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Gabadha muslimada aheey iska ilaali arintaa oo noqo qabri wax lagu aaso oo waligaa yaan arin ku saabsan qoyskaaga iyo ninkaaga lagaa maqlin, sidaa ayaad aduun iyo aakhiraba sharaf ku helaysaa insha, Allah ninkaagana ku kasban kartaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SIDDEEDAAD

NINKAAGA DABEECADDIISA BARO

Ninkaaga dabeecadiisa baro muxuu jecelyahay, muxuu ka xanaaqaa maxaa dhiba, taasi waxay kaa caawinaysaa inaad ka fogaato waxa uu dhibsado kuna dadaasho wixii uu jecelyahay. Dumarka qaarkood waligood ma koraan iyaga oo sanado badan ninkooda la jooga ayaanay hadana dabeecadihiisa baran oo had iyo jeer waxay ku celcelisaa wixii ninkeeda dhibayay.

Gabadha muslimada ah waa inay noqotaa gabadh caqli u saaxiiba oo daraaso ku samaysa ninkeeda dabeecadihiisa oo is waydiisa ninkaaga maxaa dhibaya? Kadibna ogaataa, oo ka fogaata. Hadana is waydiisa muxuu jecelyahay? Kadibna u samaysa oo ku raali galisa waxa uu jecelyahay. Marka uu ninkaagu ku arko inaad wixii uu jeclaana samaynayso, wixii dhibayayna ka daynayso taasi qalibigiisa ayaad ku kasbanaysaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Qodobka Sagaalaad:
Ku Daddaal Cusboonaysiinta

Sida guriga oo aad qaabka alaabtu u taalo badasho, cuntada oo aad badasho oo noocyo cusub aad samayso, dharka nooc cusub oo aad xidhato.

Inaad xaalad kaliya ku sugnaataa waxay keenaysaa inuu ninkaagu kaa xiiso dhigo. Markaa isbabadalku wuxuu cusboonaysiinayaa jacaylka uu ninku kuu qabo, arintanna ha u daymo la, aan waa qodob muhiima oo kamida arimaha aad ku kasban karto ninkaaga.

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

QODOBKA TOBNAAD:

KA FOGOW CABASHADA BADAN IYO CALAACALKA

Ogowna in ragu ugu neceb yihiin gabadha cabashada badan waxayna taasi tusinaysaa in gabadhaa ay shaqsiyadeedu daciif tahay, waliba marka ay ku cabato dadka kale ee jaarka iyo qaraabada.

Cabashada tusaalaheeda waxaa kamida in gabadhu ka cabato wax kasta oo ay dhibsato, tusaale ahaan shaqada guriga oo ay ka cabato, caruurta iyo dhibtooda oo ay ka cabato, jaarka oo ay ka cabato, ninka waalidkiisa oo ay ka cabato, martida ninkeeda oo ay ka cabato duruufta dhaqaale ee jirta, xanuun yar oo haya oo ay ka cabato. Waa gabadh wax kasta ay dhibayaan oo haddana aan aamusayn ee ninkii u sheegaysa, markaa ninkii had iyo jeer wuxuu dagaal kula jiraa xal u helista cabashada xaaskiisa iyo sida uu u daawayn lahaa, markaasuu ninku wuxuu had iyo jeer ku dadaalaa inuu raali galiyo, inuu bal waxa ay ka cabannayso wax ka qabto, inuu u cudur daarto,Laakiin arintaasi muddo dheer ma sii

Telegram @SOMALIBOOKS

socoto oo ninku wuu ka daalayaa cabashadaa badan oo waxaa iman doonta maalin uu quus kaa gaadho ee ogow gabadhyahay.

Ku cibro qaado Qisadii nabi ibraahim iyo ismaaciil.

Sida uu quraanku inooga waramay qisada nabi Ibraahim waa kii Ismaaciil iyo hooyadii kaga tagay meel cid la, oo ah goobta maanta ay ku taalo kacbadu, kadib nabi ismaaciil wuu waynaaday af carabigiina wuu bartay kadibna wuxuu ka guursaday dadkii degaanka ee carabta ah. Waqti danbe ayaa Ibraahim soo booqday wiilkiisii ismaaciil, wuxuuse reerka yimid isaga oo ismaaciil maqan yahay oo haweenaydii oo keli ahi joogto. Wuu waraystay sida xaalkoodu yahay, waxay ku jawaabtay calaacal oo waxay tidhi noloshayadu aad bay u adagtahay, kadib nabi Ibraahim fariin buu ugu dhiibay wiilkiisii oo wuxuu ku yidhi: odaygaagii marka uu yimaado igu salaan waxaanad ku tidhaahdaa baddal catabadda guriggaaga. Ismaaciil markii uu yimid ayay xaaskiisii u warantay oo ay u sheegtay in oday da, wayni yimid oo uu yidhi: igu salaan catabadda guriggaagana baddal. Nabi Ismaaciilna wuu fahmay fariintii, wuxuuna ku yidhi kaasi wuxuu ahaa aabahay wuxuuna I amray inaan ku furo ee orodoo reerkiinnii tag, kadibna mid kale ayuu guursaday, mar labaad ayuu ibraahim soo booqday, wuxuuse yimid markanna isaga oo ismaaciil maqan yahay oo haweennaydii joogto,

@SOMALIBOOKS

wuxuu waydiiyay ismaaciil? Waxayna u sheegtay inuu maqan yahay, waxaa kale oo uu ka waraystay xaaladdooda iyo duruuftooda, waxayna ugu jawaabtay in xaalkoodu uu aad u fiican yahay oo nimco ku jiraan, kadibna Nabi Ibraahim salaani dushiisa ha ahaatee fariin buu u faray oo wuxuu ku yidhi igu salaan, waxaanad ku tidhaahdaa catabada gurigaaga adkayso, haweenaydii fariintii bay ismaaciil u sheegtay markii uu yimid Ismaaciil wuu fahmay macnaha fariintu xambaarsanayd. Wuxuuna yidhi: kaasi wuxuu ahaa aabahay wuxuuna I amray inaan ku xajisto oo aan ku adkaysto

Qisadan waxaan ka fahmaynaa

1. In calaacalka iyo cabashadu ay tahay sifo xun oo keenaysa in naagta lagu naco oo lagu furo
2. Waxaa kale oo aan ka fahmaynaa inay wanaagsan tahay in duruuf kasta oo aad ku jirto aad ilaahay ku shugrido, waayo waxa kaa maqan iyo waxa aad haysato waxaa badan waxa aad haysato.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA KOW IYO TOBNAAD KA FOGOW WARKA DUMARKA

Gabadhu markay warkaas maqasho waxay nafteeda ku furtay albaab shar, kaas oo natiijadiisu noqoto in reerkeedu burburo.

Marka aan arimaha ka jira bulshadeena dhexdeeda aan dib u jaleecno, waxaad arkaysaa in dumarku ay had iyo jeer door wayn ka ciyaaraan burburka qoyska, gabadhii dumarka hadalkooda dhagaysataana yaanay nafteeda mooyee cid kale canaanan.

Dumarku guriggaaga ayay soo galayaan, markaasay fadhigaaga eegayaan oo ay ku odhanayaan naa yaa hee ma fadhigii wadankaad dhigatay alla yaa miskiin oo muxuu fadhiga dibada kuugu dhigi waayay? Haddana markaasay qolka hurdada galayaan oo haddana sariirtaada eegayaan oo odhanayaan naa yaahee waa maxay sariirta noocan ahi? Oo muxuu mid ka fiican kuugu dhigi waayay, naa raga waa la iska celiyaa oo waxaaga waa laga goostaa, haddii kale sharaf kuma noolaanaysid.
Naa iga badal dheh sariita. Markaasaay meel kasta oo

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

guriga kamida farta galinnayaan oo ay ka hadlayaan. Markaa gabadha aan caqliga badan lahayn marka ay naagahaas ka baxaan hadalkoodu raad buu ku yeeshaa, markaasaa marka uu ninku yimaado waxay ku bilawdaa, iga baddal sariirta, iga baddal fadhiga, qayrkay noocaa iyo noocaa baa loo dhigay anigu miyaan ka liitaa heblaayo iyo heblaayo, markaasaa halkaa waxaa ka dhaca dagaal iyo dood. Ninka ay sidaa ku leedahay ilaahay baa xaalkiisa og, waxaa laga yaabaa in daruuriyaadkii uu la tacaalayo oo aan wax intaa dhaafsiisanba haysan, haddii markaa dalabkeeda loo fulin waayana qaar baa dagaal ka xiga iyo in reerku burburo.

Markaa gabadha muslimada aheey dantaada garo, oo ninkaaga waxaanu awoodin haku kalifin. Qoyskaagana naago awgood ha u burburin. Kuwaasi marka reerkaaga aad burburiso ee aad cidlo ku soo dhacdo way kugu wiirsanayaan oo waxay odhanayaan naa tii heblaayo reerkeedii bay burburisay. Markaa ka digtoonay dumarka iyo warkooda

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LABA IYO TOBNAAD:

NOQO GABADH NAFTEEDA KU KALSOON

Kalsooni daradu waxay keenaysaa mashaakilo badan. Ogow inaad tahay qof ilaahay karaameeyay, ogow inaad tahay waxa ilaahay abuuray kii ugu khayr badnaa, ogow inaad tahay qof ilaahay dhamaystiray, caqligiisa u dhamaystiray, qurux u dhamaystiray, ka digtoonay inaad aaminto in cid kale kaa wanaagsan tahay, kaliya waxaa lagu kala wanaagsan yahay sida ilaahay loogu kala cabsi badan yahay, taasna yaan lagaaga badin ee ku dadaal, wax kale oo lagaaga wanaagsan yahay ma jiro.

Kolba meesha adigu aad is dhigto uun bay martabadaadu gaadhaysaa. Markaa meel sare naftaada dhig, oo ka fogow inaad meel hoose is dhigto. Taasi waxay ku siinaysaa kalsooni buuxda.

Hadii aad kalsooni buuxda heshana, waxaa meesha ka baxaya shaki, warwar, hinaase aan sharci ahayn.
Gabadha isku kalsooni waa gabadh xalin karta

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

mushkilado badan iyada oo aan cid kale waxba ka sugin, iyada oo aan ninkeeda ka sugin, waalidkeed ka sugin, walaalaheed ka sugan. Waxay aaminsantahay inay tahay qof karti leh oo iyadu wax qabsan karta.

Ninkaagu marka uu ku arko inaad tahay shaqsi isku kalsoon isaguna wuu kugu kalsoonaanayaa oo uu ku aaminayaa. Taasi oo aad ku kasbanayso qalbigiisa.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SADDEX IYO TOBNAAD:
NOLOSHA U QAABIL SIDA AY TAHAY

Gabadha muslimada aheey ogow inaan aduunyada loogu talagalin inay dhamaystiranto.
Aduunyadu mar walba waa mid dhiman, hore iyo danbaysana taariikhda aadamaha ma soo marin cid ay u buuxsan tahay mana soo mari doonto.
Gabadha muslimada aheey ogow in aduunyadan ay is garab socdaan shar iyo khayr, wanaag iyo xumaan, farxad iyo murugo.
Wanaag iyo khayr badhaxtiran oo saafi ah oo aan shar iyo xumaani la socon waxaa laga helaa janada oo kaliya, shar iyo xumaan badhaxtirarana waxaa laga helaa Naarta, laakiinse aduunyada labadiiba waa is garab socdaan, sharbaa yaala, khayrbaa yaala, aduunyada waxaa loogu talgalay imtixaan, khayrku waa imtixaan, sharku waa imtixaan, qaninimadu waa imtixaan, faqiirtinimadu waa imtixaan, xanuunku waa imtixaan, caafimaadku waa imtixaan.
Ilaahay wuxuu yidhi

Telegram @SOMALIBOOKS

ونبلوكم بالشر والخير فتنة وإلينا ترجعون .
(waan idinku imtixaamaynaa shar iyo khayr labadaba)

Gabadha muslimada aheey ku qanac kolba wixii aad haysato, iska jir inaad nolol khiyaali ah ku noolaato.
Ogow inaadan sida aad doonto aduunyadan ka helayn oo aanay marnaba kuu buuxsamayn, waayo aduunyada looguma talagalin inay cid u dhamaystiranto, ku dadaal saamaxaada iyo cafiska.

Gundhiga iyo gunaanada hadalkan waxaan uga soconaa, ogow in ninkaaga aanad ka wada helayn sida aad doonayso oo dhan, ninkaagu wuxuu kamid yahay ree Aadam, ree aadamna dhamays maaha. Adiga laftaadu dhamays ma tihid ee ogow oo wax baa kaa dhiman, isaguna waa sidoo kale, markaa in labada ruuxba ogaadaan sidaa kuna qancaan, oo sidaa noloshooda ku wataan iyaga oo faraxsan oo aan wax ka dhiman awgeed aan u murugoon ayaa fiican. Hadii aad tahay gabadh sidaa ku dhaqanta, taasi waxay meesha ka saaraysaa dhibaatooyin badan.
Si aad nolosha u qaabisho, wixii dhib ah samir iyo saamaxaad ku qaabil.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA AFAR IYO TOBNAAD HA CANAANAN NINKAAGA

Canaantu waxay inta badan timaadaa marka ninku uu arin ku khaldamo ama xuquuq ay gabadhu lahayd ka gaabiyo amase ay khalad fahanto oo sida ay wax yihiin mooyee si kale ay u fahanto markaas ayay gabadhu canaan ninkeeda dusha uga tuurtaa oo ay ku furtuurtaa oo u kala dhigdhigtaa.

Gabadha muslimada aheey hadii ay jirto wax aad ninkaaga ka tabanayso ama hadii aad khalad ka tirsanayso la sug waqti munaasiba iyo meel munaasiba kadibna si degan ugu sheeg. Dumar fara badan ayaa ninkooda ku waaya canaanta iyo qaylada, xataa hadii ayna taasi keenin inaad ninkaaga kala tagtaan taasi waxay xumaanaysaa xidhiidhka idiin dhexeeya.
Ogow hadalka naxariista leh ee dabacsan inuu yahay dariiqa saxda ee loo maro xalinta mushkiladaha.

Wixii dhib ah ee aad aragto ku waajah qaab siyaasadaysan adiga oo isticmaalaya hadalo naxariis

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

leh

Marka uu ninkaagu ka gaabiyo xuquuqdaada amase wax aad uga baahan tahay doonayso inuu kuu qabto dalabkaaga ugu sheeg si degan adiga oo marka hore horaysiinaya sheegida akhlaaqdiisa wanaagsan iyo sifooyinkiisa fiican ugana mahad celinaya wanaagii hore ee uu kuu qabtay Kadibna u sheego xaajadaada ama baahidaada si degan, haddii aad sidaa samayso waxaad kasban qalbiga ninkaaga.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SHAN IYO TOBNAAD

MARKA UU FARAXSAN YAHAY LA FARAX MARKA UU MURUGAYSAN YAHAYNA LA MURUGOO.

Arimaha ugu waawayn ee ninka cadho galiyaa waa inuu arko xaaskiisa oo faraxsan marka uu murugoonayo amase xaaskiisa oo murugaysan marka uu faraxsan yahay , taasi waxay keenaysaa in qalbigiisa ay xumaan ku abuurto oo laga yaabo inay dhaliso mashaakilo badan.

Telegram @SOMALIBOOKS

Gabadha muslimada ah waxaa looga baahan yahay inay khadiija Bintu khuwaylad (xaaskii ugu horeeyay ee nabiga) raali Allaha ka noqdee ay tusaale ka dhigato markii uu nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee u soo galay isaga oo gariiraya
(waa markii isaga oo godka xira ku jira waxyigii ugu horeeyay ku soo degay) oo ku yidhi khadiija I duuduub I duuduub, kadib khadiija ay waydiisay oo

@SOMALIBOOKS

ay ku tidhi oo maxaa dhacay, markii uu u waramay oo uu yidhi: Naftayda ayaan u baqay. Khadiija waxay ugu jawaabtay: Maya ha biqin ee bishaarayso, Ilaahay baan ku dhaartee ilaahay kuma hoojinayo, adigu waxaad xidhiidhisaa qaraabada, warkana waad ka run sheegtaa, martidana waad soortaa, dadkana xaqa ayaad ugu gargaartaa.

Gabadh yahay muslimada aheey miyaad aragtaa jawaabtaa jawaab ka fiican. Dhibtii iyo murugadii haysatay ayay ka khafiifisay.

Caaisha Allaha raali ka noqdee ayaa iyada oo ka waramaysa waxay tidhi: ma hinaasin hinaase ka daran hinaasaha khadiija aan ku hinaasay (ogow hada khadiija oo dhimatay weeyaane) waayo bay tidhi nabigu in badan ayuu magaceeda sheegi jiray. Maalin ayuu sheegay magaceeda markaasaan ku idhi: oo maxaad ka sheegaysaa islaan wayn oo cajuusad ah ilaahay wuxuu kuugu badalay mid ka khayr badane? Nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haatee wuxuu yidhi (Walaahi baan ku dhaartaye Ilaahay mid ka khayr badan iiguma badalin, way I rumaysay markii dadku igu gaaloobeen, way I rumaysatay markii dadku I beeniyeen, xoolaheedii bay isiisay markii dadku ii diideen xoolahooda, ilaahayna wuxuu igaga arsaaqay caruur aanan dumark kale ha helin.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LIX IYO TOBNAAD

EHELKA NINKAAGU WAA EHELKAAGA EE KARAAMEE

Arimaha keenaya in ninkaaga agtiisa aad ku waynaato oo uu kugu jeclaado waxaa kamida inaad Ehelkiisa karaamayso, gaar ahaan hooyadii.

Waxaan kaaga digayaa inaad hooyadii wax ka sheegto oo aad ka cabato, ku dadaal inaad hooyadii u samirto oo wixii dhiba ee xageeda kaaga yimaada adigu aad xaliso oo aanad isaga gaadhsiinin.

Dumarka qaar baa jecel marka ay ninka hooyadii is khilaafaan inuu ninku iyada taageero oo uu hooyadii ka hor yimaado. Gabadh yahaw muslimada aheey, arintaasi khatar wayn bay leedahay, kasoo qaad in ninkaasi adiga ku doorto oo uu hooyadiina ku caasiyoobo, miyaanu ninkaagu markaa aduun iyo aakhiraba khasaarin, taas oo adigana khasaare kuu ah. Markaa walaaleey ninkaaga sabab ha ugu noqon inuu hooyadii caasiyo, ku dadaal inaad ninkaaga ku caawiso sidii uu hooyadii ugu wanaag samayn lahaa. Waad

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

ogtahay in waalidka oo lagu caasiyoobaa uu kamid yahay danbiyada ugu waawayn ee qofku galo marka laga yimaado shirkiga.

Markaa ku dadaal inaad ehelkiisa u wanaag samayso oo aad karaamayso taasi adiga ayay aduun iyo aakhiraba kuu fiican tahay, ninkaaga qalbigiisana waad ku kasban doontaaye.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA TODDOBA IYO TOBNAAD

QAABILAADA NINKA MARKA UU GURIGA SOO GALAYO

1. U xidho dharka kiisa ugu qurux badan
2. Caruurtaada bar sida ay u qaabilayaan aabahood oo ah inay salaamaan gacmaha iyo madaxana ka dhunkadaan
3. Albaabka adigu ka fur ee ha u dirin qof kale
4. Ku qaabil salaan fiican iyo soo dhawayn adiga oo dhoolacadaynaya oo waliba dhunko
5. Raac ilaa qolkiisa kana bixi dharka adiga oo u diyaariyay biyihii uu ku maydhan lahaa iyo dharkii
6. Hadii uu harraadan yahay koob biyo ah usoo dhig ama sharaaba
7. Mashaakilada guriga waxba u sheegin.

Tani waa umu suleym haweenaydii Abuu dalxa ilmahedii yaraa ayaa dhintay, markaasaay ku tidhi Ehelkeedii ha u sheegina Abuu dalxa warkaas aniga hortay, abuu dalxa markuu soo noqday waxay ku qaabishay waji furan iyo iyada oo nafteeda aad

Telegram @SOMALIBOOKS

u qurxisay , cuntadii bay u soo dhigtay kadibna, xaajadiisii ayuu ka gutay, kadib ayay warkii u sheegtay iyada oo waliba asluub wanaagsan ugu sheegaysa. Abaa dalxoow ka waran hadii amaano laguu dhiibto kadibna cidii amaanada lahayd kaa soo doonato miyaad u diidi lahayd? Jawaabtu waa maya?

Ilmihii yaraa ilaahii ina siiyay ayaa qaatay. Markaasuu Abaa dalxa xanaaqay oo yidhi oo maxaad hore iigu sheegi wayday, ma markaan waxaan sameeyay sameeyay baad ii sheegaysaa Kadib rasuulka ayuu arintii u sheegay, rasuulkuna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee arintaa wuu ku waafaqay umu suleym wuuna u duceeyay oo yidhi: Ilaahay habeenkiina ha idiin barakeeyo) ilaahayna waa u barakeeyo oo habeenkaa tafiirtii ka dhalatay waxay noqotay toban quraanka ilaahay xifdisay.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SIDDEED IYO TOBNAAD QAABKA LOOLA DHAQMO MARTIDA NINKAAGA

1. Waliagaa ha nicin martida ninkaaga u imanaysa iska daa inaad nacdee yaan wajigaaga laga dareemin
2. Meesha ay martidu fadhiisanayaan u nadiifi una udgee
3. U diyaari cunto iyo sharaab wixii aad hayso

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SAGAAL IYO TOBNAAD MARKA UU CADHOODO NINKAAGU SIDAN ULA DHAQAN

Marka aad aragto ninkaaga oo cadhaysan hakala hortagin cadho ee isku day inaad dejiso marka hore xataa hadii uu kaa gardaran yahay, marka aad aragto inuu degay markaa mawduuca kala hadal adiga oo degan oo usoo bandhigaya asluub wanaagsan.
Kaalay oo ila akhri qisada haweenay ninkeeda konton sano nolol fiican iyo is fahan kula noolayd.

Haweenayda waxaa waraysatay Naag wariye ah oo waydiisay sirta ka danbaysa in haweenaydaasi mudadaas kontonka sano ah ay saygeeda nolol fiican oo bilaa khilaaf ah kula noolayd
Waraysigu wuxuu u dhacay sida tan.
Wariyihii: Manoo sheegi kartaa sirta aad ninkaaga ku kasbatay ma cuntada ayaad si fiican u taqaanaa, mise aad baad u qurux badan tahay? Mise caruur badan oo aad u dhashay awgeed baa? Bal noo sheeg?.
Haweenaydii ayaa ku jawaabtay: Inaad ninkaaga

Telegram @SOMALIBOOKS

nolol fiican kula noolaataa, ilaahay sokadii waxay ku jirtaa gacanta haweenayda, haweenaydu waxay awoodaa inay gurigeeda ka dhigto Jano, waxaa kale oo ay awoodaa inay gurigeeda ka dhigto cadaab.

Ninkaaga Xoolo aad leedahay awgeed kuma kasban kartid, dumar badan oo xoolo badan haysta ayaa ninkoodu ka ordayaa oo uu nacayaa,

Caruur badan oo aad dhashayna ma keenayso nolol fiican inaad ninkaaga kugula noolaato, waayo dumar badan oo toban wiil dhalay ayaa ragoodu nacaan balse ay furaanba.

Cunto wanaagsan kaligeedna maaha oo dumar badan oo cuntada xariifiin ku ah ayaa hadana ninkooda ka cabanaya.

Naagtii wariyihii ayaa Yaabaysa oo leh: Oo hadaa maxay tahay sirtu?

Haweenaydii baa tidhi: marka uu cadhoodo ninkaygu ee cadho awgeed la karo, waxaan ku qaabilaa aamus uu ixtiraam la socdo aniga oo waliba marka uu kalmad yidhaahdaba madaxa foorarinaya , iska jir inaad aamusto aamus uu dheel dheel wajigaaga ka muuqdo, ninku waa caqli badan yahay waana fahmayaa arinkaaye?

Wariyihii: oo marka uu sidaa kuula dagaalamayo ee uu canaantaa kulul kugula dul dhacayo maxaad qolka uga bixi wayday?

Haweenaydii: Iska jir arintaa, wuxuu u malayni inaad

Telegram @SOMALIBOOKS

ka baxsanaysid oo aanad doonayn inaad hadalkiisa maqasho, waa inaad aamustaa oo wax kasta oo uu yidhaahdana aad ku waafaqdaa ilaa ay cadhadu ka dagayso, kadib ayaa waxaan ku idhaahdaa: ma dhamaysatay? Kadibna aan baxaa oo aan shaqadii guriga iska sii wataa, waayo isaguna mar haduu aad u qaylyay wuxuu u baahan yahay inuu nasto.

Wariyihii ayaa ku tidhi: oo maxaa intaa kadibna aad samaysaa? Miyaad goysaa oo mudo asbuuc oo aanad la hadlayn miyaa?

Haweenaydii ayaa tidhi: Maya iska jir arintaa waa arin aan fiicnayn. Hadii aad sidaa samayso isaga oo doonaya inaad heshiisaan, wuxuu ka sii qaadayaa canaad iyo madax adayg.

Wariyihii ayaa waydiisay: oo kadib maxaad samaysaa?

Haweenaydii waxay ku jawaabtay: Mudo kadib ayaan ku soo noqdaa aniga oo u sida koob sharaaba ama koob shaaha oo aan ku idhaahdaa fadlan hoo oo cab, waayo waan ogaay inuu u baahan yahay, kadibna si caadi ah ayaan ula hadlaa.

Markaasuu I waydiiyaa oo uu yidhaahdaa: miyaad cadhaysan tahay? Markaasaan ugu jawaabaa: maya ma cadhaysni, markaasuu bilaabaa inuu iga raaligaliyo hadalkiisii oo hadal fiican I maqashiiyaa.

Wariyihii ayaa waydiisay: oo miyaad ka aqbashaa oo aad rumaysataa isaga oo sidaa kuu galay?

Telegram @SOMALIBOOKS

Haweenaydii: Haa dabcan ma waxaad I moodaysaa inaan ahay doqon, ma waxaad iga doonaysaa inaan isaga oo cadhaysan hadalkiisa rumayso oo marka uu cadho furfuro hadalkiisa beeniyo.

Wariyihii: oo Karaamadaadii uu meel kaga dhacayna?

Haweenaydii: karaamadaydu waa raali ahaashaha ninkayga iyo xidhiidhkayaga oo wanaagsanaada.

Karaamo kale oo ninka iyo xaaskiisa ka dhaxaysaa ma jirto, oo karaamada aad sheegaysaa maxay tahay? Miyaanad hortiisa maryahaaga oo dhan iskaga bixin? Sheekadaasi waa sheekadii dhex martay haweenaydaa kontonka sano ninkeeda nolosha fiican kula noolayd, gabdhaha doonaya inay guursadaan iyo kuwa guursadayba ee imika reeraha lehba waxaa ugu sugan cibro iyo waano qaadasho, Maanta marka aan dib ugu soo noqono guryaheena iyo sida ay dumarkeenu u dhaqmaan, wax badan bay ka duwan tahay sidaa haweenaydu ay sheegtay, marka ninku uu cadhoodo ee hadalo cadho leh ku hadlo iyaduna hadalkaa mid ka daran bay ugu jawaabtaa, halkaana waxaa ka dhasha dagaal xoog badan oo aan waxba la iskula hadhin oo faraha lagaga gubto, sida fiican ee cadhada lagu xalin karaa waa sidaa haweenaydu ay casharka inoogu dhigtay, waxaa la gudboon in gabdhaha muslimiinta ahi ay wax ka bartaan haweenaydaa oo ay u dhaqmaan

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

sida ay u dhaqantay si lamida, waxay ka faaiidayaan wax badan oo horumarisa oo wanaajisa xidhiidhka ninkeeda

Waxaa kale oo muhiima inaad ku dhaqanto qodobada hoos ku qoran.

1. Hadii khaladku dhinacaaga ka yimidna waa inaad ninkaaga ka raaligalisaa khaladkaagana qirataa. Dumarka intooda badan iyaga oo khaldan ayay khaladkooda ku adkaystaan ama ay difaacaan taasina waxay keentaa kala fogaasho aad u wayn.
2. Waligaa ha seexan ninkaaga oo cadhaysan hadii aad sidaa samayso taasi waxay keenaysaa in danbi wayn aad ku dhacdo oo malaaigta ayaa ku nacdalaysa ilaa inta waagu ka baryayo sida uu nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee sheegay.
3. Waxaa kale oo muhiima marka ay labada is qabaa wada hadlayaan in caruurta aanay maqal haba yaraatee, hadii caruurtu maqlaan taasi raad xun bay ku yeelanaysaa markaa iska jir oo ku dadaal in qol gaara aad odaygaaga ku wada hadashaan.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LABAATANNAAD MARKA UU XANUUNSADO NINKAAGU

1. Ninkaaga agtiisa fadhiiso oo gacantaada madaxiisa saar kuna akhri adkaarta sida faataxadaa iyo macwadataynka.
2. Ninkaaga wixii uu u baahan yahay oo dhan sida dawada iyo wixii kale ee lamida kula dadaal
3. Madaxa ka dhunko adiga oo u ducaynaya
4. Kalmado aad u wanaagsan kula hadal sida adiga oo leh macaane ilaahay haku caafiyo, gurigu adiga la'aantaa nolol kama jirto iyo wixii lamidaa
5. Caruurta buuqooda ka ilaali oo qolkiisu ha noqdo meel dagan oo bilaa buuq ah

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA KOW IYO LABAATANAAD

GOGOSHA

1. U imo ninkaaga adiga oo is nadiifiyay is cadriyay oo xidhan dharkii hurdada oo aad u fiican khaasatan dharka khafiifka ah
2. Gogoshiisa ha noqoto mid aad u nadiifa oo si fiican loo goglay loona udgeeyay
3. Ku dadaal inaad caruurta horey u seexiso
4. U dhoola cadee ninkaaga lana kaftan oo la qosol
5. Uga sheekee sheekooyin fiican oo faaiido leh oo aan danbi ku jirin
6. Ka ilaali inaad mushkilad jirta kaga hadasho gogosha. Gabadha muslimada ahi waa inay aqoon u leedahay ahmiyada ay gogoshu iyada iyo ninkeedaba u leedahay, waa meel ilaahay ugu tala galay in lagu xasilo oo naftu ku dagto, laguna

Telegram @SOMALIBOOKS

ilaabo dhibaatada aduunyada, maaha goob dagaal amase goob dacwadeed, waxaase nasiib daro ah in dumar badani aaminsan yihiin in marka gogosha la yimaado ninka arimo badan laga saxeexi karo, qaarbaa wax alla wixii mushkilad jirtay faylalkooda waqtigaas uun la sugta , oo ninkeeda habeenkaa sidaa ku hurda seejiya, siday dood iyo dagaal ugula jirto. Gabadha muslimada aheey Gogoshu maaha goob dacwadeed, gogoshu maaha goob doodeed, gogoshu maaha goob dagaal, waa goob raaxo iyo nasasho Ninkaagu waqtigaa wuxuu u baahan yahay deganaasho iyo inuu xaaskiisa la raaxsaysto markaa iska jir, ku dadaal gogoshu inay noqoto meel lagu ilaawi karo dhibtii ninkaaga dibada kasoo qabsatay.

7. Hadii uu ninkaagu kuu baahdo marnaba ha diidin.

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

QODOBKA LABA IYO LABAATANAAD SHAQADIISA

1. Xasuusi ninkaaga waqtiga shaqada oo ku dadaal inaanu marnaba ka habsaamin
2. U diyaari ninkaaga waraaqihiisa iyo qalabakiisa shaqo oo dhan si uu aroortii dagdag ugu qaato
3. U diyaari dharkiisa oo kaawiyadaysan aroorta inta aanu shaqo tagin iyo kabahiisa oo baalashaysan
4. Hadii uu shaqada dib ugu dhaco la xidhiidh oo waydii sababta, laakiin haku badin xidhiidhka, dumarka qaar baa shakiya hadii ninkoodu dib u dhaco iyaga oo aan ogayn sababta waana kuwa hinaasaha badan. Waligaa haku canaanan dib u dhaciisa.
5. Ogow ninkaaga horumarkiisa iyo dib u dhiciisa inaad qayb muhiima ka tahay, waxay carabtu tidhaahdaa (nin kasta oo muhiima haweenay baa ka danbaysa). Ka caawi ninkaaga sidii uu himilooyinka uu hiigsano u gaadhi lahaa, oo wixii dhinacaaga kaaga aadan qabo

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SADDEX IYO LABAATANAAD CUNTADIISA

1. Gabadha wanaagsani waa inay taqaanaa cuntada ninkeedu jecelyahay ee caafimaad ahaana u fiican waana inay la socotaa xaaladiisa caafimaad
2. Ninkaagu guriga ha yimaado iyada oo cuntadu u diyaar tahay
3. Ha u dirin ninkaaga gabadha shaqaalaha ah si ay ugu adeegto ee adigu cuntada u gee.
4. Cutadiisa cid kale yaanay u Karin ee adigu u kari
5. Ninkaaga sii cuntooyinka wanaagsan ee caafimaadka leh
6. Baro sida loo sameeyo cuntooyin fara badan oo kala duwan oo kolba mid cusub u samee.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA AFAR IYO LABAATANAAD XALINTA KHILAAFAADKA

1. Gabadhu waa inay ogaataa inuu ninku yahay masuul taladana isagu leeyahay iyadana ay waajib ku tahay inay aqbasho, kaliya waxayna ku aqbalayn wixii xaaraan ah ee diinta khilaafsan, oo marka khilaaf yimaado inay teeda ka tanaasusho oo ay tiisa qaadato.

2. Gabadhu inay masuuliyad qaado oo ayna wixii ka dhiman ka sugin ninkeeda ee iyadu isku daydaa inay hagaajiso.

3. Inay gabadhu u tanaasusho ninkeeda xataa hadii iyadu xaq ku taagan tahay oo isagu ka gardaran yahay, oo ay eegto dhibta ka dhalanaysa hadii khilaafku sii socdo oo la afjari waayo. Gabadha aragtida dheeri waxay xeerisa arimo muhiima oo mustaqbalkeeda iyo ka caruurteeda u dan ah.

4. Ka fogow inaad kalmado xun xun oo dhaawacaya qalbiga ninkaaga inaad ku hadashid marka khilaaf jiro. Isku day inaad hadasho adiga oo dagan kuna hadal kalmado wanaagsan.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SHAN IYO LABAATANAAD ISKA JIR HINAASAHA AAN SHARCIGA AHAYN

Masayrku ama Hinaasuhu guud ahaan waa mid bannaan
Sida axaadiista ku soo aroortayna
Nabigu wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee

قال: عن أبي هريرة -رضي الله عنه- عن النبي -صلى الله عليه وسلم- قال: ((إن الله تعالى يغار، وغيرة الله تعالى أن يأتي المرء ما حرم الله عليه))([1])، متفق عليه.

(Alle wuu qiiroodaa, qiirada ilaahayna waa in ruuxu la yimaado wixii uu Alle Xarrimay).
Gabadhuna ninkeeda waa inay ku masayrtaa marka uu la yimaado wixii Alle xarimay, masayrka noocaas ahi waa mid wanaagsan oo waliba waajiba, laakiinse hinaasaha shakiga ku dhisan ee dumarka in badan oo kamida ay caadaysteen waa mid aan wanaagsanayn oo sabab u noqda inuu dumiyo guryo badan.
Dumarka waa wax Alle ku abuuray oo lama odhan

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

karo naagina yaanay ninkeeda ku masayrin, oo masayrku asalkiisu wuxuu ka dhashaa jacayl ay gabadhu jeceshahay ninka sidaa awgeed ay doonayso inuu kaligeed ku ekaado oo aan cid kale la wadaagin, laakiin masayrka la diidan yahay waa marka uu dhaafo xadkiisa oo uu abuuro mashaakillo badan. Gabadha muslimadda waxaa la gudboon inay la timaado wixii waajibaad ah ee xaga ninkeeda kaga aadan oo ah kuwaa aan ka soo sheekaynay, ninkeedana ay ku kalsoonaato oo ilaahayna talada saarato, nafteedana ayna ku dhibin wax aan la hubin inuu jiro iyo inaanu jirin. Waxaa kale oo gabadha muslimada kula talinnaynaa inay ogaato in ninkeeda ayna xoog iyo dagaal ku haysan Karin, haddii uu damco inuu mid kale guursado, balse cidlo ka hinaasku uu yahay arimaha keena in ninku naag kale raadsado,

Waxaan garannayaa rag badan oo dumarkoodu hinaase badnaayeen, oo iyada oo aanay waxba jirin uun shaydaan kooraha saaro, oo haddii uu yara habsaamaba shaydaanku ugu sheekeeyo inuu naag kale ku maqan yahay, marka uu yimaadana ay dagaal ku qaadaa, markaasuu yidhaa naa hooy joog waxba ma jiraan imika, laakiin haddii aad sidaa iga dayn waydo wallee waan ka dhabayn doonaaye, way ka daynwayday markaasuu ka dhabeeyay, markaa yaa u sabab ah ninkaasi inuu naag kale guursado.

Si aanad u hinaasin dhawrkan talo iga qaado.

Telegram @SOMALIBOOKS

1. Qodobada buuggan ku qoran si fiican ugu dhaqan, taasi waxay keenaysaa inaad ninkaaga kasbato oo aanu kaa helin dhaliil, haddiise ay dhaliilahaagu bataan oo aad qodobadan ku dhaqmi waydo ogow inaad adigu sabab u tahay
2. Naftaada ku kalsoonow oo aamin inayna jirin naag kaa wanaagsani, haddiise ay kalsoonni darro kugu dhacdo, oo aad aaminto inaad naagaha kale ka hoosayso taasi shiki iyo warwar bay kugu dhalinaysaa, oo waxaad is leedahay; ninku naag kaa fiican buu raadsanayaa, markaasaa geeduhu kuu shanqadhayaan oo talaabo kasta oo ninku qaado aad u turjumaysaa inuu naag kale doonayo
3. Marka aad wixii aad awoodo la timaado, wixii kale Alle u dhaaf oo naftaada haku dhibin wax ilaahay uuni og yahay inuu dhici iyo inaanu dhici doonin.

Hadii uu ninkaagu mid kale kula guursado maxaad samayn?

1. Horta bilawga hore waad yara bood booddi oo kollay waa wax ilaahay kugu abuuray, laakiin caqligaagu ha shaqeeyo oo caadifadaadu yaanay shaqayn, arinka ha gaadhsiin meel fog ee is daji, shaydaanka iska naar, ogow inuu dhacay wax ilaahay qaddaray oo aan isaga iyo adiga midna joojin Karin, waxaad yeeshaa wixii kula gudboon oo ah qodobka labaad
2. Iska jir in odaygaagii aad muddada dheer aad wada

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

dhaqnaydeen ee ilaahay caruurta idinkala siiyay ay gabadh reerka ku cusubi kaa qaaddo, ku dadaal inaad xidhiidhkiisa wanaajiso oo waliba siddii hore si ka fiican ula dhaqanto. Waxaan aragnay dumar xariifiin ah oo markii lala guursaday iska daa inay hinaasaane, sii labanlaabtay dadaalkeedii heer ay tii cusbayd hinaasday hinaase xun oo ninkii markii uu hinaasaheedii u adkaysan waayay uu tii cusbayd furay. Waxaan garanayaa oo aan jaar ahayn qoys, ninkii ayaa gabadh yar la guursaday haweenaydii hore, haweenaydii hore tollow maxay samaysay baad u mallaynaysaa?

Way is dajisay, shaydaanka ayay iska naartay, wax waji xumo ah ama haddal xun midna lamay iman, gurigii bay qurxisay, uunsi bay ku shiday si fiican bay ugu gogoshay, hadal fiican bay kula hadashay, wax kasta oo yidhaahdana haye xaaji bay tidhi, waxa dhacay ma garanaysaa?

Tii yarayd ee cusbayd wuu iska illoobayba
Waxaan garanayaa in tii yarayd ay hinaasday oo ay ku kacday oo ay leedahay I fur waryaa orodoo cajuusadaada hayso, oo.
Talladaa aan ku siiyay waa talo dhaxal gal ah haddii aad diiddo wixii ku gaadha adiga ayaa ka mas'uula ee cid kale haku canaan.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LIX IYO LABAATANAAD

NINKAAGA HA WAYDIIN SU'AALO AANU JECLAYN IN LA WAYDIIYO, HANA BAADH BAADHIN SIRTIISA

Dumarka qaar baa gaadha heer ay telefoonkiisa baadhaan si ay u ogaadaan dadka uu xidhiidhka la leeyahay, taasina waa arin khatar ah keeni karta kalsooni daro natiijadeedu noqoto kala dhimasho. Markaa iska jir inaad ninkaaga sirihiisa baadh baadho, sidoo kale isagana uma banaana inuu sirtaada baadh baadho, waxaa fiican in kalsooni labada ruux isku qabaan sidaana ku wada dhaqmaan, qofba qofka kalena malo fiican ka qabo, wixii isaga waajibkiisa ahna guto.

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

QODOBKA TODOBA IYO LABAATANAAD QALBIGAAGA HAKU QARSAN WIXII AAD NACAYSO

Hadii ay jirto arin aad nacayso oo ninkaaga xagiisa ah, si cad ugu sheeg si aad uga bogsato, hadiise ay arintaasi qalbigaaga ku ururto oo aad sheegi waydo, waxaa dhici doonta inaad mar uun qaraxdid sida bamka Markaa inta aanay arintu qarax gaadhin iska sheeg oo ka wada hadla adiga iyo ninkaagu.

@SOMALIBOOKS

QODOBKA SIDDEED IYO LABAATANAAD DHOOLACADAYN

Waa inaad noqotaa gabadh had iyo jeer ninkeeda u dhoola cadaysa, kana fogow inaad noqoto mid waji cabuus ah oo waji xidhan.

Dhoolacadayntu guud ahaanba waa dhaqan muhiima oo qof kasta oo muslin ah looga baahan yahay, gaar ahaan marka ay isa salaamayaan. Nabiguna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu ku tilmaamay inay sadaqo tahay, Inkasta oo aad qurux badan tahay hadii aad tahay mid bilaa dhoolacadayn ah waxad ka dhigantahay guri bilaa iftiin ah. Dhoolacadyntu waa leeb kuu kala jeexaya qalbiga ninkaaga

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SAGGAAL IYO LABAATANAAD

Ka fogow macsiyada noocay doonta ha ahaatee Danbigu wuxuu saamayn wayn ku yeeshaa nolosha labada is qaba, imisa ayaa dhibaato dhex dhacday laba is qaba sababteedu ahayd danbi uu galay labadooda midkood, maraa walaashayda muslimada aheey ka fogow macsiyada iyo inaad wixii ilaahay kaa xarimay ku dhacdo, kuna dadaal inaad ninkaaga garab ugu noqoto gudashada daacada Rabi.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SODDONAAD

Marka uu ninkaagu kula joogo wax kale ha ku mash-quulin:
Sida inaad shaqada guriga ku mashquusho, ma aad jaraaid akhrisato ama aad telefishin daawato, waxaase fiican inaad ninkaaga dareensiiyo in qalbigaaga iyo jidhkaaguba isaga la jiraan.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA KOW IYO SODDONAAD KU DADAAL QURUXDA NINKAAGA

Ninkaaga dharkiisa nadaafadooda iyo kaawiyadooda ku dadaal oo yaanu ninkaagu guriga ka bixin isaga oo qurux badan mooyee, maxaa yeelay marka uu la kulmo saaxiibadii ee ay arkaan isaga oo qurux badan waxay dareemayaan in haweenay fiicani ka danbayso hadiise ay arkaan isaga oo muuqaal xun leh waxay dareemayaan in haweenaydiisu ayna wanaagsan.

Markaa ka dadaal dharka ninkaaga iyo guud ahaanba quruxdiisa, yaanu gurigaagana ka soo bixin isaga oo qurux badan mooyee.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA LABA IYO SODDONAAD HA NOQON GABADH GALID BADAN IYO BIXID BADAN

Ha ahaado bixitaankoodu mid macquul ah oo aad u baxayso arimaha muhiimka ee aan adiga mooyee cid kale kuu soo qaban Karin, hadii aad u baxayso booqasho sida ehelkiina iyo saaxiibadaa ka idan qaado ninkaaga, Bixida badan ee gabadhu ay guriga ka baxdaa wuxuu wax yeeleeyaa xidhiidhka lamaanaha isqaba.

Telegram @SOMALIBOOKS

QODOBKA SADDEX IYO SODONAAD BARO OO CAADO KA DHIGO INAAD KU HADASHO KALMADAHAN

Baarakalaahu fiika, jasaakalaahu khayr, xabiibi waan ka xumahay (marka aad qalad ka gasho), dayib dal-abkaagu waa diyaar, ilaahay sokadii cid kale oo aan adiga ahayn ma lihin, ilaahay hanoo kaa xifdiyo. Iwm.

Telegram @SOMALIBOOKS

GUNAANAD

Dardaarankii umaama bintu xaaris ay markii gabadheeda la guursaday siisay Haweenayda la yidhaahdo umaama bintu xaaris ayaa markii gabadheeda la aroosay waxay u soo jeedisay dardaaran muhiima Waxay hadalkeeda ku bilawday: gabadhyahay hadii dardaaranka lagaga maarmaamayo edeb aad dadka dheertahay amase aad ka nasab fiican tahay awgeed waan kaa dhaafi lahaa, laakiinse waa xasuusin qofka moog, qofka caqligana waxay u tahay caawin iyo gargaar Gabadhaydiiyeey: hadii naagi ka maarmi lahayd nin aniga ayaa aabahaa ka maarmi lahaa, laakiinse dumarka rag baa loo abuuray ragana dumar baa loo abuuray.

Gabadhaydiiyeey: maanta waad ka baxday seerihii aad ku jirtay ee aad ka soo dhexbaxday, waxaanad u tagtay wiil aanad hore u aqoon, iyo saaxiib aanad hore u aqoon, Maamulkiisana waad hoos tagtay, u noqo adoon, isaguna addoon buu kuu noqone waxaanad ku dadaashaa inaad u xifdido toban arimood:

Telegram @SOMALIBOOKS
@SOMALIBOOKS

Ta koowaad iyo ta labaad:

Qanaaco hakaa helo ninkaagu, wuxuu uu ku amrana ku maqal oo ku adeec

Qanaacada qalbiga ayay raaxo u tahay, dhaqanka wanaagsanina ilaahay buu raaligaliyaa.

Ta sadexaad iyo ta afraad

Meesha ishiisu qabato ka dadaal, meesha sankiisu uriyana ka dadaal, indhihiisu yaanay qabanin wax xun, Yaanu kaa urinina ur aan wanaagsanayn.

Ta shanaad iyo lixaad: waqtiga cuntadiisa haka dib dhicin, waqtiga uu seexdana ka warhay. Gaajadu way kulushahay, hurdada oo laga dhargi waayaana cadho ayay keentaa

Telegram @SOMALIBOOKS

Ta todobaad iyo ta sideedaad:

Maalkiisa ka dadaal , caruurtiisa ka dadaal. Maalkiisa si fiican u maamul, caruurtiisana si fiican u dhaqaalee

Ta sagaalaad iyo ta tobnaad:

sir uu leeyahay ha fidinin, amar uu ku siiyana ha caasinin. Hadii aad sirtiisa fidiso kama aamin noqon doontid balan burintiisa, hadii aad caasidana waad

ka cadhaysiisay Ka digtoonow inaad faraxdo, isaga oo murugaysan, kana fogow inaad murugooto isaga oo faraxsan. Ta hore waa gaabis, ta labaadna waa dhooqayn,Mar kasta oo aad qadariso ninkaaga adigana aad buu kuu karaamayn, markasta oo aad waafaqdo sida uu doonayana isaguna adiga ayuu kugu waafaqayaa waxa aad doonayso, ogowna gabadhyahay inaadan sidaa awoodi doonin ilaa waxa uu isagu raalida ka yahay aad ka horeysiiso waxa adigu aad raalida ka tahay, oo waxa isagu uu jecel yahay aad ka horeysiiso waxa adigu aad jeceshahay, ilaahay baa markaa khayr ku siin doona, ilaahay baan amaano kaaga dhigay.

Telegram @SOMALIBOOKS

TIXRAACA

أختاه كيف تكسبين زوجك لشيخ محمود المصري
فن التعامل مع الازواج عبد الجبار أحمد
كيف تكسبين قلب زوجك عادل فتحي
052 نصيحة الزوجية صفاء شمندي
كوني متميزة وانيقة صفاء شمندي

Telegram @SOMALIBOOKS